




Su'aalo ku saabsan Tallaalka COVID-19



Tallaalka COVID-19 miyuu iga difaaci doonaa in aan la bukoodo COVID-19?

Haa. Tallaalka COVID-19 wuxu u shaqeeyaa isaga oo baraya habdhiska difaacaaga sida uu u aqoonsado ulana dagaalamo fayraska sababa COVID-19, tanina waxay kaa difaacaysaa in aad la bukooto COVID-19. In lagaa difaaco in aad bukooto waa muhiim waayo in kastoo dad badan oo qaba COVID-19 ay leeyihiin kaliya jirro fudud, kuwa kale ayaa lahaan kara jirro daran, lahaan kara saameyn caafimaad oo muddo dheer ah, ama xataa dhiman kara.

Tallaalka COVID-19 miyuu iga dhigi karaa in aan la bukoodo COVID-19?

Maya. Midkoodna tallaalka la ansixiyay ee lagu taliyay ee COVID-19 ama tallaalka COVID-19 ee hadda la samayanayo ee Maraykanka kuma jiraan fayraska nool ee keena COVID-19. Tani waxay ka dhigan tahay in tallaalka COVID-19 uusan kaa dhigi karin in aad la bukooto COVID-19.

Ka dib markaan qaato tallaalka COVID-19, miyaa la iga heli karaa COVID-19 marka aan maro baaritaanka fayraska?

Maya. Midkoodna tallaalka dhawaan la ansixiyay oo lagu taliyay iyo tallaalka kale ee COVID-19 ee hadda ku jira tijaabooyinka caafimaad ee Maraykanka kuuma keeni karaan in lagaa helo cudurka marka lagu mariyo baaritaanada fayraska, kuwaas oo loo adeegsado in lagu ogaado in aad qabto caabuq hadda ah.

Haddii aan horay u qaaday COVID-19 oo aan ka bogsaday, miyaan weli u baahanahay in la igu tallaalo tallaalka COVID-19.

Haa. Iyadoo ay sabab u tahay khataraha caafimaad ee daran ee la xiriira COVID-19 iyo xaqiiqda ah in ay suurtagal tahay in dib uu kuugu dhaco caabuqa COVID-19, tallaalku waa muhiim iyadoo aan loo tixgelinayn in aad horay u qaaday caabuqa COVID-19. Xilligan la joogo, khubaradu ma garanayaan muddada qofka laga difaacayo in uu mar kale bukoodo ka dib markii uu ka bogsaday COVID-19. Difaaca qofka uu helo marka uu ku dhaco caabuq, oo loo yaqaano difaaca dabiiciga ah, ayaa qofba qofka kale uu uga duwan yahay. Caddeyn hore ayaa sheegaysa in difaaca dabiiciga ah uusan sii jiri karin muddo dheer.

Miyuu tallaalka COVID-19 beddeli doonaa DNA-gayga

Maya. Tallaalka COVID-19 mRNA ma beddelayaan ama lama falgalayaan DNA-gaada si kastaba.

Ammaan ma ii tahay in aan qaato tallaalka COVID-19 haddii aan jeclahay in aan maalin uun ilmo dhalo?

Haa. Dadka raba in ay mustabalka uur qaadaan ayaa qaadan kara tallaalka COVID-19. Dadka isku dayaya in ay hadda uur yeeshaan ama qorsheynaya in ay isku dayaan mustaqbalka ayaa qaadan kara tallaalka COVID-19.

